



Isbeddello lagu sameeyay caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah, laga bilaabo 1.1.2024

Qaunuunka cusub ee wasaaradda arrimaha gudaha ee ku saabsan dib u laabashada ikhtiyaariga ah, wuxuu wax ka beddelayaa cadadkii caawimaadda dib ulaabashada ikhtiyaariga ah. Qaunuunka cusub wuxuu shaqayn doonaa muddada u dhexeysa 1.1.2024–31.12.2025.

Caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah waxaad heli kartaa, haddii aad codsaday magangalyo, islamarkaana lagu siiyay go'aan diidmo ah ama aad iska kansashay codsigaagii la xiriiray badbaadada caalamiga ah.

Sida uu dhigaayo qaunuunka cusub, cadadka caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah waxaa ay ku xiran tahay, marxaladda ama xilliga uu qofku soo gudbiyo codsiga caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah. Caawimaadda inta ugu badan waxaa ay noqon doontaa caawimaadda kale ee waxtarka ah ee aan lacagta ahayn.

Caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah, laga bilaabo 1.3.2024

Cadadka caawimaadda, haddii aad dib ugu laabanayso dal muwaadiniintiisa looga baahan yahay fiiso ama dal kugal marka ay Finland imaanayaan:

- Haddii aad codsato caawimaadda dib u laabashada muddo 30 maalmood gudahood ah, laga soo bilaabo marka ay ku soo gaartay wargelinta go'aanka koowaad ee diidmada magangelyada, ama aad markii ugu horraysay iska baajisay ama iska kansashay codsigii magangalyada qaxootinnimo, cadadka caawimaadda waxaa uu noqonayaa 5300 yuuro
- Haddii aad codsato caawimaadda dib u laabashada muddo ka badan 30 maalmood gudahood, laga soo bilaabo marka ay ku soo gaartay wargelinta go'aanka koowaad ee diidmada magangelyada, ama aad markii ugu horraysay baajisay ama aad iska kansashay; cadadka caawimaadda waxaa uu noqonayaa 2000 euroa
- haddii aad magangalyada codsatay wax ka badan 1mar: 2000 yuuro

Suuraggalnimada ah caawimaad intaa ka badan waa mid mar keliya ah.

Caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah, haddii aad xilligaan haatan ah haysato 1 ama ka badan diidmada go'aanka magangalyada

Hadii aad xilligaan haatan ah haysato 1 ama ka badan go'aanka diidmada magangalyada, islamarkaana aad doonayso inaad dib ugu laabato dalkaagii:

- haddii aad caawimaadda dib u laabashada codsato muddada u dhexeysa 1.1.2024–28.2.2024, waxaad heleysaa caawimaad dhan 5300 yuuro. Sidoo kale xaaska iyo carruurta adiga kula laabanaya waxaa qof walbaa uu heli doona caawimaad dhan 5300 yuuro.
- haddii aad caawimaadda dib u laabashada codsato taariikhda ah 1.3.2024 ama kaddib, islamarkaana wargelintii go'aankii ugu horreeyay ee codsigaaga



magangalyada ay ka soo wareegtay in ka badan 30 maalmood, waxaad heleysaa caawimaad dhan 2000 yuuro.

Isbeddellada kale ee lagu sameeyay caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah, laga bilaabo 1.1.2024

- Haddii aad tahay muwaadin dalkiisa aan looga baahnayn fiisada lagu soo galo Finland, adiga laguma siinaayo caawimaadda dib u laabashada ikhtiyaariga ah. Si kastaba waxaa suuraggal ah in lagaa bixiyo kharashka safarka aad ku aadayso dalkaaga hooyo.
- Haddii aad tahay dhibbane soo maray ka ganacsiga dadka, waxaa lagu siinayaan caawimaad dhan 3000 oo yuuro.
- Haddii aad ku sugar tahay xaalad dhibnaato leh ama aad tahay qof leh baahiyaha gaarka ah, waxaa adiga lagu siin karaa lacag gaarayso 1000 yuuro oo ah caawimaad dheeri ah oo ka baxsan caawimaadda caadiga ah. Xittaa haddii aad ka timid dalalka aan wax fiiso ah looga baahnayn soo gelitaanka Finland, waxaa lagu siinaaya caawimaaddaan laga baaraandegay ee dheeriga ah.

Sidaan soo socota ayaad ku heleysaa macuumaadka dheeriga ah ee ku saabsan dib u laabashada ikhtiyaariga ah

Haddii aad ku jirto xerada qaxootiga, islamarkaana aad doonayso inaad ku laabato dalkaagii hooyo, waxaad la xiriirtaa shaqaalaha xerada qaxootiga.

Haddii aad ku jirto xerada qaxootiga, islamarkaana aad doonayso inaad ku laabato dalkaagii hooyo, waxaad la xiriirtaa Hoggaanka socdaalka (imaagareeshinka):

- Telefoonka 050 413 8625 sidoo kale waxaad kala xiriiri kartaa dhanka WhatsApp-ka).
- Iimeylka waxaad u soo diri kartaa adigoo u soo marinaaya adeegga Securemail ee Hoggaanka socdaalka (securemail.migri.fi), cinwaanka iimeylka ee ah return@migri.fi, si farriintu ay qaab kalsooni leh ugu gaarto halkii loogu talaggalay.

Waxaad Hoggaanka socdaalka ka heleysaa talosiin ku baxaysa luqadaha af-finishka, af-ka-iswidhishka, af-ingiriisiga ama af-carabiga.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka akhrisaa:

- Macluumaadka wasaaradda arrimaha gudaha (Sisäministeriön tiedote): [Uusi asetus vapaaehtoisen paluun avustuksesta tulee voimaan vuoden 2024 alussa \(intermin.fi\)](http://uusi.asetus.vapaaehtoisen.paluun.avustuksesta.tulee.voimaan.vuoden.2024.alussa.intermin.fi)
- [Vapaaehtoinen paluu \(migri.fi/paluu\) \(Dib u laabashada ikhtiyaariga ah\)](http://migri.fi/paluu)